

# BIYO KU DAR

xirmadaada xaalada degdega ah



[www.regionalh2o.org/personal-preparedness](http://www.regionalh2o.org/personal-preparedness)

# BIYO KU DAR

xirmadaada xaalada degdega ah



[www.regionalh2o.org/personal-preparedness](http://www.regionalh2o.org/personal-preparedness)

# Kaydinta sahayda dhanka biyaha ee xaalada degdega ah waa mid sahlan

Sahaydaada dhanka biyaha ee xaalada degdega ah waxay ka koobnaan kartaa dhalooyinka biyaha ee aad ka soo gadato tukaanka, ama waxaad buuxin kartaa weelashaada gaarka ah. Haddii aad soo gadato dhalooyinka biyaha, waxaad xaqiijisaa in aad ku hayso weekii asalka ahaa oo aadan furin ilaa aad u baahato in aad isticmaasho.

Haddii aad isticmaasho weel kuu gaar ah, xaqiiji in uu dabool adag leeyahay, isla markaana uu samaysan yahay weel cuntada loogu talagalay oo balaastik ama bir ah oo loogu talagalay in lagu hayo biyo, isla markaana si sax ah loo nadiifiyo ka hor inta aadan ka buuxin biyaha tuubada/qasabada.

## Nadiifinta weelkaaga

1. Isticmaal saabuunta weelasha iyo biyo nadiif ah si aad u buuxda ugu dhaqdo weelkaaga iyo daboolkiisa.
2. Si fiican weelkaaga ugu dhaq biyo nadiif ah.
3. Hal qaado oo ah warankiilada/biliijta ka samaysan chlorine ee dareeraha ah guriga taala ee aan urta lahayn ku qas afar koob oo biyo ah.
4. Biyaha warankiilada/biliijta leh ku shub weelkaaga, bedel daboolka, isla markaana adkee.
5. Si xoog leh u rux weelkaaga muddo ilaa 30 daqiiqadood, adiga xaqiijinaya in dhammaan meelaha dushooda la daboolay.
6. Biyaha warankiilada/biliijta leh ka soo shub weelka isla markaana weelkaaga maran hawada ku qalaji.

## Buuxinta weelkaaga la nadiifiyay

1. Weelkaaga buuxi ilaa korka — ka taxadar in aadan gacantaada ku taaban halka laga furayo ama qasabadaha biyaha iyada oo laga yaabo in tani wasakheyso biyahaaga ama weelkaaga.
2. Talaabadani way kala duwan tahay iyada oo ku xiran hadba meesha biyahaagu ka yimaadaan:
  - biyaha ka yimaado ceelka ama meel kale oo aan la daaweynin → waxaad u baahnaan doontaa in aad ku darto 1/8 oo warankiilo/biliij ah gallon-kiiba.
  - biyaha ka yimaada shirkadaha biyaha laga bixiyo, sida magaalada → uma baahnid in aad biyahaaga ku darto warankiilo/biliij sababta oo ah isla hadaba waa kuwo la daaweeyay
3. Daboolka dib u saar. ka taxadar in aadan taaban xagga hoose ama gudaha daboolka marka aad ku xirayso weelka, isla markaana xaqiiji in uu si fiican ugu xiran yahay.
4. Calaamad iyo taariikh u yeel weelkaaga si aad u ogaan karto markii aad buuxisay.

Urur Goboleedka Shirkadaha Biyaha Bixiya waa urur wada shaqayneed iyo dhanka isku-duwida oo ka shaqeyya kor u qaadida qorsheynta iyo maamulida biyaha degmada ee magaalo weynta Portland, meelaha magaalada ah OR. Wax badan ka ogow waxyaabaha ku saaban Urukka, xubnihisa, iyo shaqadiisa dhanka u diyaargarowga xaalada degdega ah, ilaalinta biyaha, iyo isku-duwida gobolka adiga oo booqanaya [www.regionalh2o.org](http://www.regionalh2o.org).

♻️ Lagu daabacay warqad dib loo warshadeeyay.

©Urur Goboleedka Shirkadaha Biyaha Bixiya 2018

## KAYDINTA BIYAHA EE AY TAHAY IN LA SAMEEYO & AY TAHAY IN AAN LA SAMAYNIN

**WAXAAD** dhalooyinka biyaha ka soo gadataa dukaanka ama isticmaal weelkaaga kuu gaarka ah si aad u kaydiso biyo

**WAXAAD** isticmaashaa weelasha cuntada loogu talagalay sida kuwa laga helo xerada fasaxa la aado 'camping' ama tukaamada bannaanka ku yaala ama dhalooyinka soodhaha ee labada litir ah

**HA** isticmaalin weelasha ka samaysan dhalada, caagaga wax lagu rido ee hore loogu isticmaalay caano ama cabitaan, ama weelashada loo isticmaalay kiimikada ama warankiilo/biliij

**WAXAAD** bedeshaa biyahaaga 6 bilood oo kasta (ma xumaanayaan, sidaa darteed haddii aad ugu baahato xaalad degdeg ah isla markaana biyuhu jiraan wax ka badan lix bilood markaa sii wad in aad isticmaasho)

**WAXAAD** kaydisaa biyaha ugu badan ee aad awoodo (haddii loo baahdo, ku bilow waxoogaa biyo ah waxaanad kordhisaa sahaydaada)

**WAXAAD** biyahaaga ku kaydisaa meel qabow, mugdi ah (haddii ay suurtagal tahay)



# Kaydinta sahayda dhanka biyaha ee xaalada degdega ah waa mid sahlan

Sahaydaada dhanka biyaha ee xaalada degdega ah waxay ka koobnaan kartaa dhalooyinka biyaha ee aad ka soo gadato tukaanka, ama waxaad buuxin kartaa weelashaada gaarka ah. Haddii aad soo gadato dhalooyinka biyaha, waxaad xaqiijisaa in aad ku hayso weekii asalka ahaa oo aadan furin ilaa aad u baahato in aad isticmaasho.

Haddii aad isticmaasho weel kuu gaar ah, xaqiiji in uu dabool adag leeyahay, isla markaana uu samaysan yahay weel cuntada loogu talagalay oo balaastik ama bir ah oo loogu talagalay in lagu hayo biyo, isla markaana si sax ah loo nadiifiyo ka hor inta aadan ka buuxin biyaha tuubada/qasabada.

## Nadiifinta weelkaaga

1. Isticmaal saabuunta weelasha iyo biyo nadiif ah si aad u buuxda ugu dhaqdo weelkaaga iyo daboolkiisa.
2. Si fiican weelkaaga ugu dhaq biyo nadiif ah.
3. Hal qaado oo ah warankiilada/biliijta ka samaysan chlorine ee dareeraha ah guriga taala ee aan urta lahayn ku qas afar koob oo biyo ah.
4. Biyaha warankiilada/biliijta leh ku shub weelkaaga, bedel daboolka, isla markaana adkee.
5. Si xoog leh u rux weelkaaga muddo ilaa 30 daqiiqadood, adiga xaqiijinaya in dhammaan meelaha dushooda la daboolay.
6. Biyaha warankiilada/biliijta leh ka soo shub weelka isla markaana weelkaaga maran hawada ku qalaji.

## Buuxinta weelkaaga la nadiifiyay

1. Weelkaaga buuxi ilaa korka — ka taxadar in aadan gacantaada ku taaban halka laga furayo ama qasabadaha biyaha iyada oo laga yaabo in tani wasakheyso biyahaaga ama weelkaaga.
2. Talaabadani way kala duwan tahay iyada oo ku xiran hadba meesha biyahaagu ka yimaadaan:
  - biyaha ka yimaado ceelka ama meel kale oo aan la daaweynin → waxaad u baahnaan doontaa in aad ku darto 1/8 oo warankiilo/biliij ah gallon-kiiba.
  - biyaha ka yimaada shirkadaha biyaha laga bixiyo, sida magaalada → uma baahnid in aad biyahaaga ku darto warankiilo/biliij sababta oo ah isla hadaba waa kuwo la daaweeyay
3. Daboolka dib u saar. ka taxadar in aadan taaban xagga hoose ama gudaha daboolka marka aad ku xirayso weelka, isla markaana xaqiiji in uu si fiican ugu xiran yahay.
4. Calaamad iyo taariikh u yeel weelkaaga si aad u ogaan karto markii aad buuxisay.

Urur Goboleedka Shirkadaha Biyaha Bixiya waa urur wada shaqayneed iyo dhanka isku-duwida oo ka shaqeyya kor u qaadida qorsheynta iyo maamulida biyaha degmada ee magaalo weynta Portland, meelaha magaalada ah OR. Wax badan ka ogow waxyaabaha ku saaban Urukka, xubnihisa, iyo shaqadiisa dhanka u diyaargarowga xaalada degdega ah, ilaalinta biyaha, iyo isku-duwida gobolka adiga oo booqanaya [www.regionalh2o.org](http://www.regionalh2o.org).

♻️ Lagu daabacay warqad dib loo warshadeeyay.

©Urur Goboleedka Shirkadaha Biyaha Bixiya 2018

